



# Roosevelt High School



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

Roosevelt High School waa dugsi sare oo casri ah dhammaystiranna oo leh bixinno koorso firfircoon iyo shaqaale ku hagta ardayda ku guuleysiga akademiya maanta iyo u diyaarinta kuleejada iyo shaqooyinka qalin-jabinta ka dib.

Casriyeynta \$102 milyan ee dhismaha taariikhiga ah ee sanadkii 1921-dii ee Roosevelt waa la dhameystiray. Waxyaabaha ugu muhiimsan ee isbeddelka waxaa ka mid ah 19 fasallo dheeri ah, saddex shaybaar oo cusub oo lagu barto cilmiga farsamada, sheybaar injineernimada dhismaha ah, saddex shaybaar saynis oo cusub, aag ballaadhan oo la wadaago iyo barxadda la balaariyay, laba tiyaatar oo farshaxan iyo shaybaar kombuyuutar oo la wadaago. Intaa waxaa dheer, munaaraddii saacadda ee iskuulka ayaa heshay dib-u-habeyn buuxda oo hadda waa saacad shaqeyneysa.

Roosevelt waa mid ka mid ah iskuulada sare ee ugu qowmiyadaha badan gobolka Oregon. Ardaydeenna iyo qoysaskeennu waxay ku hadlaan in ka badan 27 luqadood oo adduunka ah. Roosevelt's Riders sidoo kale waxaa taageera bulshada kobcaysa ee firfircoon ee St. Johns iyo barayaal heellan oo rajooyin sare ka qaba dhammaan ardayda.



## Qiyamyada Rider

### Ixtiraam

Waan aqbalnaa oon u dabaaldegnaa kuwa kale, iyo nafteenaba. Waxaan aqoonsan nahay dadnimadeenna wadajirka ah iyo shakhsiyadeed iyo caqligeenna, annaga oo aan illoobi doonin "In Lak'ech\*\*".

### Daacadnimo

Waxaan daacad ku nahay hadal iyo ficilba. Waxaan qaadanaaynaa masuuliyada ficilkeena waxaana kula xisaabtanna nafteenna iyo midba midka kale heerarka ugu sarreeya ee shaqsiyadeed iyo akademiyeed.

### Kala duwanaa

Waxaan muujinaynaa kala duwanaanta qowmiyadaha iyo jinsiyada, jinsiga iyo kala duwanaanta galmada, iyo kala duwanaanta dhaqamada iyo luqadaha, anagoo ku faaneyna cida aan nahay iyo dhamaan waxa aan mataleyno.

### Awodsiin

Waxaan nahay koox shaqsiyaad ah oo inta badan nafteenna, iyo kuwa kaleba na weydiya, maxaa yeelay waxaan ognahay inaan haysanno qalabka, garashada iyo dadaal aan ku qeexo oon ugu beddelo xaqiiqdeenna si togan.

### Ka go'naan

Waxaa naga go'an waxbarashadeena iyo yoolalkayaga, mana ka leexan doonno. Waxaan si dhab ah u qaadaneynaa nafteenna waxaana si adag ugu shaqeyneynaa dhammaan dadaalladeenna, annagoo og in shaqadeenna adag iyo go'aankeennu ay qeexayaan haatan iyo mustaqbalkeenna labadaba.

**Waxaan nahay kuwo adkeysii leh - markaan dhacno, marwalba waan kacnaa.**

\* Laga xigtay gabayga "In Lak'ech", 1971 uu qoray Luis Valdez

## Roosevelt High School

6941 N Central St. · Portland, OR 97203 · (503) 916-5260 · [www.pps.net/roosevelt](http://www.pps.net/roosevelt)



**Himilada Roosevelt:** Si loo hubiyo in dhammaan ardayda ku qalinjabiyaan waqtigii loogu talagalay, diyaar u ahaadaan kuleejada iyo xirfadda ay doorteen, u heellanaadaan bulshooyinka ay ku dhex nool yihiin.

## Ka qeybgalka Waxbarashada

### Koorsooyinka Meelaynta Hore iyo Dhibcooyinka Labaaleyaasha

Ardayda Roosevelt waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qaataan Meelaynta Hore iyo Labo-Dhibcaalaha markay u diyaar garoobaan adkaanta iyo caqabadaha fasalladaan. Waxaan bixinaa koorsooyin ku saabsan farshaxanka Luuqadda, Xisaabta, Farshaxanka Dabacsan, Sayniska, iyo Cilmigga Bulshada. Ardayda dhammeeya koorsooyinka Laba-Dhibcaalaha waxaa laga yaabaa inay kasbadaan illaa 30 dhibcooyin kuleejo illaa sannadka ugu dambeeya. Koorsooyinka la bixinayo waxaa lala kaashaday Mt. Hood Community College, Portland Community College iyo Portland State University. Intii lagu jiray sanad dugsiyeedka 2017-2018, 129 arday ayaa kasbaday 430 dhibcooyinka PCC kaliya. Tani waxay u dhigmataa \$40,000 oo ah baaqi ka noqotay waxbarashada.

### Barashada Isbaanishka iyo Luqadaha Adduunka

Waxaan bixinaa koorsooyin adag oo Jabbaan iyo Isbaanish ah. Barnaamijkeenna Barashada Isbaanishka wuxuu ka caawiyaa ardayda inay horumariyaan akhriska, qorista, iyo ku hadalka afka. Ardaydu sidoo kale waxay kasban karaan Shahaadada Oregon Seal of Biliteracy, ee aqoonsanaya aqoonta laba luqadood ama in ka badan.

### Horumarka Loo maro Go'aaminta Shakhsiyeed (AVID)

AVID waa barnaamij dalka oo dhan ah, ku saleysan cilmi baaris oo bixiya taageerada aqriska sare, qorista iyo xirfadaha cilmi baarista ee loogu baahan yahay si ay kuleejo iyo AP diyaar ugu noqdaan. Barnaamijkeenna AVID wuxuu galayaa sannadkiisii 13aad ee xeradayada. 58-deena qalinjabinaya ee qalinjabiyaasha 2018 u qalmay ku dhowaad \$1,742,00 deeqo waxbarasho. Dhammaan qalinjebiyayaasha iska qoray AVID dhammaadka sanadka ayaa qalinjabiyaay.

### Barashada Xirfadaha iyo Farsamada (CTE)

Roosevelt waxay bixisaa koorsooyin kala duwan oo sahamiya shaqooyin iyadoo diiradda la saarayo xirfadaha la xiriira shaqada. Fasalladaas waxaa ka mid ah:

- Naqshadeynta injineernimada
- Sayniska Kombiyuutarka
- Robotikada
- Isgaarsiinta iyo Daabacadaha
- Bilowga Nijaarnimada
- Bilowga barista

## Tusmooyinka Roosevelt

Saddexdii sano ee la soo dhaafay, ardayda Roosevelt waxaa la siiyay ku dhowaad \$12 milyan oo deeq waxbarasho ah oo loogu talagalay kuleejka. Abaalmarinnadan waxaa ka mid ahaa dhowr deeqo waxbarasho oo gaar u ahaa Ardayda Roosevelt, saddex Gates Millennium Scholars, iyo hal deeq waxbarasho oo buuxa oo Stanford University ah. Intaa waxaa dheer, Roosevelt waxay leedahay macallimiin dhowr ah oo Shahaadada Hay'adda Qaranka haysta, hal Macallinka Sanadka ee Oregon, iyo hal saxafi oo loo magacaabay Pulitzer Prize ayaa ka tirsan shaqaalaha.

## Ciyaaraha fudud

Orod tanka, Kubadda Gacanta, Kubadda Cagta, Kubadda Laliska, Kubadda Koleyga, Legdinta, Dabaasha, Kubadda jilicsan, Beesbaal, Waddyinka orodka, Teenis, Kooxda Qoob-ka=ciyaarka Sare ee Rider

## Naadiyada

Roosevelt waxay leedahay naadiyo badan oo arday oo ay ka mid yihiin: Kooxda Gabayada, Bulshada sharafta Qaranka, Naadiga Dhaqanka Afrika, Qaranka Hindida Maraykanka Roosevelt, Escalera, Mecha, Naadiga Key iyo Midowga Ardayda Madaw

